



Ugu dambeyntii la cusbooneysiisay:  
Luulyo 24, 2020

## Hagida Dib u furida Gobolka oo dhan - Isu imaatanada, Kulamada Bulshada ee Gudaha ah

**Amarka:** Amarka Fulinta Lambarka 20-27, ORS 433.441, ORS 433.443, ORS 431A.010

**Khusaynta:** Hagidan waxay quseysaa usu imaantinka gobolka oo dhan iyo kulamada bulshada ee gudaha ah.

**Hirgelinta:** Ilaa xadka uu hagistan u baahan yahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waa wax la fulin karo sida lagu qeexay Amarka Fulinta ee 20-27, baragaraafka 26.

**Qeexitaano:** Ujeedooyinka hagistan dartood, qeexitaanada soo socda ayaa lagu dhaqmi:

- **“Isku-imaadka”** micnaheedu waa koox dad ah oo u kulmaya ujeedo guud oo ay ka mid yihiin caqiidooyin ku saleysan caqiido, diin, dhaqan iyo ujeedooyin kale, gudaha ama dibedda. Usu imaanshaha kuma jirto kulamada bulshada ee gudaha.
- **“Isu imaatinka bulsheed ee gudaha”** micnaheedu waa koox shaqsiyadeed oo ugu kulmaya dan guud ahaaneed ama ujeedo madadaalo gudaha. Kulamada bulshada gudaha waxaa ku jiro laakin kuma xadidna xafladaha cashada gudaha, xafladaha dhalashada, xafladaha qalin jabinta, dabaaldagyada oo nooc walba ah, wada cunista, buug wada aqrinta, ciyaaraha habeenka, iyo usu imaanshaha gudaha kale ee la midka ah. Isu-kulanka bulsheed ee gudaha kama mid aha Isu-imaatinnada.

### Xadka Tirada Ugu Badan:

- Degmooyinka wajga 1-aad kujira xadka tirada ugu badan ee isu-imaatinka waa:
  - 50 qof oo gudaha ah
  - 50 qof oo banaanka ah
- Degmooyinka wajga 2-aad kujira, xadka tirada ugu badan ee usu imaanshaha waa:
  - 50 qof oo gudaha ah
  - 100 qof oo banaanka ah
- Gobolka oo dhan, iyadoo aan loo eegayn wejiga gobolka uu ku sugan yahay, xadka tirada ugu badan ee kulamada bulsheed ee gudaha waa:

- 10 qof oo gudaha ah.
- Xadka tirada ugu badan ee lagu qeexay hagidaan ma quseyso isu imaatinka iyo isu-kulanka bulshada ee gudaha goobta ku daboolan hagida Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ee gaarka u ah qayb kale, maadaama goobahaasi ay leeyihiin xadkooda tirada ugu badan iyo xayiraado kale. Goobaha gaarka ah ee ay hagida OHA khuseyso waxaa ka mid ah, laakiin kuma xadidno munaasabadaha, maqaayadaha iyo baararka, goobaha tafaariiqda, xarumaha madadaalada ee gudaha iyo banaanka, ganacsiyada la xiriira jimicsiga, xarumaha waxbarashada sare, iskuulada, iyo barnaamijyada daryeelka caruurta.

## Guud Ahaan:

### Ilaa iyo inta suurta gal ah hawl-wadeenada iyo qabanqaabiyaasha isu-imaatinnada iyo kulan-bulsheedka gudaha ah waa inay:

- Tixgeliyaan usu imaanshooyinka banaanka markii ay suurtoagal tahay.
- Ku dhiirogeliyaan dadka inay guriga joogaan haddii ay qabaan aastaamaha COVID-19 iyo/ama haddii ay halis ugu jiraan jirooyin daran (ka weyn 65 jir ama qabo xaalad caafimaad oo liita).
- Ku dhiirogeliyaan martida inay ku dhaqmaan nadaafada wanaagsan ee gacmaha oo leh gacmo dhaqid joogto ah oo ah ugu yaraan 20 ilbiriqsi ama isticmaalida jeermsidilaha gacmaha (oo ka kooban aalkolo 60-95%).
- Ku dhiirogeliyaan martiyada inay ku daboolaan qufacooda/hindhista curcurka ama istiraasho. Haddii martida isticmaalaan istiraasho, waa inay isla markiiba ku tuuraan istiraashada qashin qubka oo dhaqaan gacmahooda.
- Ku dhiirogeliyaan martida inay ka fogaadaan taabashada wajjigooda.
- Ku laasimaan martida inay isticmaalaan maaskarooyin, gaashanada wajjiga ama daboolada wajjiga. Haddii [Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashaanka Wajjiga, Waji Daboolada](#) ay quseyso goobaha halka usu imaanshaha lagu qabanayo, maaskarooyin, gaashaanada wajjiga, daboolada wajjiga ayaa qasab ah. Dib u eegaan [hagida OHA ee gaarka u ah qeybta ee](#) loo gu tallogalay goobaha halka Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashaanka Wajjiga, Waji Daboolada ay quseyso.
- Hubiyaan in qalabka hawo siinta si haboon ugu shaqeeyo wixii ah usu imaanshaha gudaha. Kordhiyaan hawo qeybinta ilaa intii suurtoagal ah iyada oo la furayo daaqadaha iyo albaabada, iyada oo la isticmaalayo marwaxadaha, ama la adeegsanayo qaabab kale.

## Kala Fogaanshaha Dadka iyo Tirada Dadka Jooga Goobta:

### Howlwadeenada usu imaanshaha waxaa looga baahanyahay inay:

- Go'aamiyaan tirada ugu badan ee aag walboo ah gudaha iyo banaanka si loo joogteeyo sharuuda ah ugu yaraan lix (6) fuud oo ka fogaansho jireed ah oo u dhaxeeyso kooxyada,

iyo inay si haboon u xadeyaan tirada shaqsiyaadka ku jira dhismooyinka. U isticmaalaan agg ah 35 fuud qofkiiba taasi oo ah hagida go'aaminayso tirada ugu badan.

- Joogteyaan kala fogaanshaha jireed oo ah ugu yaraan lix (6) fuud oo u dhaxeeyso dadka, marka laga reebo in xubnaha isla kooxda ay ka qeybqaadan karaan howlaha, wada joogsan karaan leenka oo aysan u baahnayn inay kala fogaadaan lix (6) fuud. Baaxad ah ugu yaraan lix (6) fuud oo u dhaxeeyso kooxyada waa in la joogteeyaa.
- Go'aamiyaan fadhiisiga iyo ama qaabeynta loogu hogaansamayo dhammaan sharuudaha kala fogaanshaha jireed.
- U xilsaaraan kormeere kala fogaanshaha jireed si loo xaqiijiyo ku dhaqanka dhammaan shuruudaha kala fogaanshaha, oo ay kujiraan albaabada laga galo, kuwa laga baxo, suuliyada iyo meel kasta oo kale oo dadku ku kulmi karaan ama dadku ku badan yihiin.
- Isku geynin kooxyada ama aysan ogolaan wadaagida fadhiga ee shaqsiyaadka aanan ku jirin isla kooxda.
- Ka saaraan ama xadeyaan aagaga fadhiga ama joogsiga si ay u fududeyaan sharuuda ah ugu yaraan lix (6) fuud oo kala fogaansho jireed ah oo u dhaxeeyso dhinacyada.
- Ka mamnuucaan dadka kooxyada kala duwan ka tirsan inay ku kulmaan/isugu imaadaan aagg kamid ah xarunta, gudaha iyo banaanka labadaba, oo ay ku jiraan qaybaha baakinka.
- Qaabeeyaan booska banaanka si loo hubiyo in kooxyada aysan ka badanayn 10 qof. Tusaale ahaan: ha u hagaajin miisaska wax ka badan 10 qof miiskiiba ama ha u qaabeynin fadhiga xaflada kooxyada in ka badan 10 kursi.

**Howladeenada qeybaha gaarka ah waa inay u hogaansamaan hagida gaarka u ah [qeybtooda](#).**

## **Nadiifinta iyo Jeermis-dilidda:**

**Howlwadeenada usu imaanshaha waxaa looga baahanyahay inay:**

- Si fiican u nadiifiyaan dhammaan aagaga booska usu imaanshaah ka hor dib u furida xiritaanka la dheereeyay kadib.
- Si fiican u nadiifiyaan booska usu imaanshaha inta u dhaxeeyso dhacdooyinka iyadoo la raacayo sharuudaha nadiifinta iyo jeermisdilidda.
- Icticmaalaan jeermisdilayaasha lagu daray [liiska la ansixiyay ee Wakaalada Illaalada Bay'ada \(EPA\) ee](#) loogu talagalay fayruuska SARS-CoV-2 ee sababa cudurka korona fayraska. Ma jiraan badeeco lagu qorayo COVID-19 weli, laakin badeecooyin badan waxay yeelanayaan qoraal ama warbixin laga heli karo websaydyada oo ku saabsan wax ku oolkooda wax kaqabashada fayraska korona ee aadanaha.
- U xilsaaraan adeegaha nadaafada ama adeegayaasha si ay si joogto ah ugu nadiifiyaan oo u jeermis dilaan aagaga shaqada, aagaga mashquulka badan, iyo sagxadaha badanaa la taabto ee ku yaalo aagaga ay geli karaan shaqaalaha iyo bulshada.

- U xilsaaraan adeegaha nadaafada ama adeegayaasha si ay u nadiifiyaan qolalka nasiinyada saacad walba inta lagu jiro munaasabada, iyo si ay u xaqiijiyaan aqabyada nadaafinta oo ku fillan (tusaale ahaan, saabuun, warqada musqusha, oo ka kooban 60-95% alkulada jeermis dillaha gacmaha) inta lagu jiro dhammaan munaasabadaha.

**Howladeenada qeybaha gaarka ah waa inay u hogaansamaan hagida gaarka u ah [qeybtooda](#).**

## **Hagida dheeraadka ah ee howlwadeenada usu imaanshooyinka:**

**Howlwadeenada usu imaanshaha waxaa looga baahanyahay inay:**

- Dib u eegaan oo ay hirgaliyaan [Hagida Guud ee Oregon ee Loo-shaqeeyayaasha ee kusaabsan COVID-19](#).
- U hogaansamaan mid walboo ah [hagida qeybta ee OHA](#).
- Dhejiyaan [calaamado waadax ah](#) oo qorayo aastaamaha COVID-19, oo ku hagayo shaqaalaha iyo ka qeybqaatayaasha qaba aastaamaha inay joogaan guriga ama ku laabtaan guriga, oona qorayo cida lala xiriirayo haddii ay u baahan yihiin caawin.

## **Illo Dheeraad ah:**

- [Calaamado aad dhejin karto](#)
- [Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashaanka Wajiga, Waji Daboolada](#)
- [Hagida CDC ee Maamulayaasha Jardiinooyinka iyo Xarumaha Madadaalada](#)

**Helitaanka dokumintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhs.ohio.gov](mailto:OHA.ADAModifications@dhs.ohio.gov).